

# Ka qayb galinta Bulshada

# Wax Akhriska/Qorista Hore ee Bulshada Dhexdeeda iyo Guriga

Sanadkii 2023, Guddoomiyaha Gobolka Oregon Tina Kotek iyo Sharci-dejinta Oregon ayaa bilawday Qorshaha Guusha ee Wax Akhriska/Qorista Hore si looga caawiyo carruurta ku nool Oregon barashada xirfadaha wax akhriska, qorista, hadalka, iyo dhageysiga. Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODE) ayaa qoysaska iyo kooxaha bulshada taageeraysa iyaga oo carruurta ka caawinaya horumarinta xirfadahaasi. ODE waxay rabtaa in ay abuurto waxyaabo la adeegsado 'materials' iyo qalab 'tools' loogu talagalay kooxahaasi bulshada iyaga oo caawinaya qoysaska iyo carruurta.

ODE waxay la shaqeysay Oregon's Kitchen Table (OKT) si loo ogaado waxa dadku u baahan yihiin si carruurta looga caawiyo horumarinta xirfadaha wax akhriska, qorista, hadalka, iyo dhageysiga. Waxa ay ODE maqashay waxay qaabeyn doonaan waxyaabaheeda la adeegsado 'materials' iyo qalabkeeda 'tools' loogu talagalay kooxaha bulshada.

OKT waxay u isticmaashay ra'yi ururintani iyo kulamadani si ay wax uga maqasho dadka Oregon oo dhan. Guudmarkani wuxuu sheegayaa waxa ay OKT maqashay.

## KU SAABSAN MIISKA JIKADA EE OREGON

OKT waa qayb ka mid ah Jaamacadda Gobolka Portland. OKT waxay ka shaqeysaa in dadka oo dhan la siiyo cod ah dhanka go'aan qaadashada dadweynaha. Waxaanu la hadalnaa dadka aan sida caadiga ah lagu darin go'aanadani. Waxaan dadka ka caawinaa in ay ka hadlaan arrimaha gobolka degaanka, iyo heerka goboleedka. Waxaa dhici karta in aanu isticmaalo siyaabo badan iyo luqaddo badan si loo ogaado waxa ay dadku qabaan iyo waayo-aragnimada. Waxaanan qiimeynaa fikradaha kala duwan iyo waayo-aragnimada dadku wax nooga sheegaan.

## SIDA AAN WAX UGA MAQALNAY DADKA

Waxaan isticmaalnay qalabka soo socda si aan u ogaano waxa ay dadku ka qabaan ama ka dareensan yihiin ka taageerida carruurta ee horumarinta wax akhriska, qorista, hadalka, iyo dhageysiga.

- Ra'iyi ururinta warqada ah
- Ra'yi ururinta dhanka internet-ka oo ku qoran sagaal luqaddood
- Wada hadalada OKT oo lala leeyahay qoysaska iyo kooxaha bulshada
- Tilmaamo loogu talagalay dadka si ay u qabtaan wada hadaladooda gaarka ah

Waxaan isticmaalnay qalabka soo socda si aan dadka ugu sheegno wax ku saabsan ra'yi ururinta iyo dhacdooyinka:

- Warbaahinta bulshada
- Nidaamyada farriinta koox ahaaneed
- Farriimaha email-ka iyo qoraalka ah
- Wicitaanada telefoonka
- Wacyigelinta shakhsi ahaaneed

## WAXAAN DADKA WAX KA WEYDIINAY

Marka hore, waxaan dadka wax uga sheegnay sida ay ODE u taageeri doonto kooxaha bulshada si qoysaska iyo carruurta looga caawiyo horumarinta xirfadaha wax akhriska/qorista hore. Marka xigta, waxaan dadka wax ka weydiinay kuwa soo socda:

- Waxa ay yihiin hawlaha ay la sameeyaan qoysaskooda iyo / ama carruurtooda si loo horumariyo wax akhriska, qorista, hadalka, iyo xirfadaha dhegeysiga

- Waxa ay yihiin hawlaha ay jeclaan lahaayeen in ay wax badan ka arkaan bulshadooda
- Waxa ay rabaan in ay wax badan ka ogaadaan si carruurta looga caawiyo horumarinta xirfadaha wax akhriska, qorista, hadalka, iyo dhageysiga
- Caqabadaha ugu waaweyn ee ay arkaan ee dhanka caawinta qoysaska iyo carruurta si loo horumariyo xirfadahaasi
- Haddii ay qayb ka yihiin koox bulsho, sida ay iskaashi ula yeeshaan dugsiyada
- Waxa ay yihiin rajooyinka ay ka qabaan carruurta ka tirsan qoysaskooda iyo bulshooyinkooda ee ku saabsan wax akhriska/qorista hore

Ra'yi ururintu waxay sidoo kale dadka weydiisay da'aha carruurta ay taageeraan ama cidda ka tirsan qoyskooda, halka ay ku nool yihiin, da'dooda, jinsigooda, qoymiyaddooda ama Qabiilkooda, iyo luqadda ay doorbidayaan in ay isticmaalaan.

## CIDDA AAN WAX KA MAQALNAY

Waxaan wax ka maqalnay in ka badan 800 oo qof. Qiyaastii kala bar dadku waxay doorbidaan in ay macluumaadka ku helaan luqad aan ka ahayn Ingiriisi. Dad badan oo ka tirsan koox oo ay soo food saartay helitaanka fursad waxbarasho oo aan loo sinnayn.

Waxay u wadaageen siyaabaha soo socda:

- 391 qof oo ka soo jawaabay ra'yi ururinta
- Dad ka soo qayb galay 12 kulan oo ay gacanta ku hayeen abaabulayaasha bulshada
- Dad ka kala socday kooxdaha bulshada oo ka soo qayb galay 10 wada hadal oo ka dhacay Zoom
- Dad ka kala socday 17 urur oo noo sheegay waxa dadku ka sheegayaan wax akhriska/qorista hore ee bulshooyinkooda dhexdooda

## WAXA AAN MAQALNAY

Waxaan wax badan ka ogaanay waxa dadku sameynayaan oo ay rabaan in ay wax badan ka arkaan si carruurta looga caawiyo horumarinta xirfadaha wax akhriska, qorista, hadalka, iyo dhageysiga. Kooxo badan oo bulshada ah ayaa isla haddaba wax badan qabanaya bulshooyinkooda dhexdeeda. Qoysas badan ayaa wax badan qabanaya si ay u caawiyaan carruurtooda. Kooxaha bulshada iyo qoysaska labadooduba waxay rabaan taageero.

**Waxa dadku isku raaceen**

- Xirfadaha wax akhriska, qorista, hadalka, iyo dhageysigu ay muhiim u yihiin guud ahaan nolol maalmeedka qoyska. Taasi way adkaan kartaa. Laakiin sidoo kale waxay ka dhigan tahay in ay jiraan siyaabo badan oo looga taageero carruurta in ay bartaan iyaga.
- Waa muhiim in la sharfo oo la xuso waxa qoysaska iyo bulshooyinku ay isla haddaba qabanayaan.
- Waa muhiim in goobaha iyo dadka caawiya qoysaska iyo carruurtu yihiin kuwo farxad iyo madadaalo leh. Sidoo kale waa muhiim in la yeesho soo dhaweyn diiran bilawgaba.
- Dadku waxay rabaan in ay haystaan ama bixiyaan wax barid 'tutoring' dheeraad ah. Laakiin dadku waxay u arkaan in ay adkaan doonto in la sameeyo.
- Kooxaha bulshadu waxay rabaan in ay iskaashi la yeeshaan dugsiyada. Waxay rabaan in ay wada shaqeeyaan si loo caawiyo qoysaska iyo carruurta.

**Waxa dadku isku khilaafeen**

- Dadka qaarkood ayaa u arka in tiknoolajiyadu ay gacan ka geysan karto in ay carruurta ka taageerto horumarinta wax akhriska, qorista, hadalka, iyo dhageysiga. Dadka kale ayaa u arka in ay fiican tahay in la adeegsado waxyaabo gacanta laga qabanayo.
- Dad badan ayaa raba in ay xaqiijiyaan in kooxaha bulshadu ay wax ka og yihiin oo adeegsadaan cilmi-baaris iyo caddeyn si ay u fahmaan waxa sida fiican ugu shaqeyn kara carruurta. Dad kale ayaa ka walwalsan in cilmi-baaristaasi iyo caddeyntaasi aysan noqon doonin hadal iska cad. Dadka qaarkood ayaa raba in ay xaqiijiyaan in carruurtu ay weli yeelan doonaan madadaalo.

## WAXA DHACAYA EE XIGA

Faallooyinka dadku waxay siinayaan ODE fikrado ku saabsan waxa lagu darayo waxyaabaha la adeegsado 'materials' iyo qalabka 'tools' loogu talagalay kooxaha bulshada. ODE waxay sidoo kale maqashay fikrado cusub oo ku saabsan sida loo helo fikrado mustaqbalka. Dadku waxay jecel yihiin in ay ka mid noqdaan ka caawinta carruurta ku nool Oregon ee in ay siyaabo badan u horumariyaan xirfadaha wax akhriska/qorista hore.

ODE waxay sameyn kartaa kuwa soo socda:

- Cusbooneysiinta waxyaabaha la adeegsado ‘materials’ iyo qalabka ‘tools’ muddo marka la joogo
- Wax badan lala hadlo dadka carruurtoodu bartaan laba ama ka badan oo luqaddood
- Dadka laga caawiyo xusida iyo in midba mid ka kale wax ka barto
- Caawimaad laga geysto ku xirka kooxaha bulshada ee dugsiyo dheeraad ah. Tani waa in ay si dheeraad ah u wada shaqeeyaan.

## GUNAANADKA

Dad badan ayaa raba in ay ka mid noqdaan ka caawinta carruurta ku nool Oregon ee horumarinta xirfadaha wax akhriska, qorista, hadalka, iyo dhageysiga. Waxay rajeynayaan in kooxaha bulshadu wax badan la shaqeyn karaan qoysaska iyo dugsiyada.